VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN

# Foomka su'aalaha ee waalidiinta – Luqadda

## Booqashada caafimaadka marka ilmaha jiro 2,5 sano

Marka aad adiga iyo ilmahaagu booqataan Xarunta Daryeelka Caafimaadka Carruurta (BVC), waxaan dabagalnaa horumarka xiriirka iyo luqadda ee ilmahaaga. Waan kaaga mahadcelinaynaa haddii aad su'aalaha soo socda kaga jawaabtaan guriga ka hor booqashada. Haddii aad tihiin laba waalid ama ka badan, fadlan si wadajir ah u buuxiya. Su'aalahani waxay saldhig u yihiin wada hadalka inta lagu jiro booqashada. Adiga/idinkuna sidoo kale waxaad fursad u heli doontaan inaad soo bandhigtaan su'aalihiina inta lagu gudo jiro booqashada Xarunta Daryeelka Caafimaadka Carruurta ee BVC.

Magaca ilmaha: ________________ Taariikhda dhalashada ilmaha: _______________________

Taariikh: _______________________ Waxaa ka jawaabay: _______________________________

Luuqadaha lagaga hadlo qoyska: ______________________________

1. Maka welwelsan tahay hadalka iyo horumarka luqadeed ee ilmahaaga?
   ☐Haa ☐Maya
2. Ilmahaagu ma muujiyaa xiise uu kula xiriiro kulana hadlo carruurta iyo dadka waaweyn?
   ☐Haa ☐Maya
3. Imisa eray ayuu ilmahaagu ku hadli karaa? (Looma baahna inuu erayada si sax ah ugu dhawaaqo, laakiin waa inaad fahmi kartaa waxa uu ula jeedo.)
   ☐0-25 eray ☐25-50 eray ☐ka badan 50 eray
4. Ilmahaagu ma isticmaalaa ishaarooyin si ka badan hadalka, tusaale ahaan madaxa oo uu ruxo marka uu bixinaaya jawaabta maya, ama innuu gacanta haadiyo ama wax ku tilmaamo?
   ☐Haa ☐Maya
5. Ilmahaagu ma isku xiri karaa laba eray ama ka badan si uu u sameeyo weedho/jumlooyin gaagaaban?
   ☐Haa ☐Maya
6. Awoodda luqaddu kuma koobna oo keliya in la hadli karo, balse sidoo kale waxaa ka mid ah in la fahmi karo. Ilmahaagu ma fahmaa weedho dhaadheer, tusaale ahaan: "Soo qaad boombalaha ee ku jira jikada"?
   ☐Haa ☐Maya
7. Ilmahaagu ma ku qabaa dhibaato calalinta iyo/ama liqidda cuntada?
   ☐Haa ☐Maya

Fadlan foomkan oo aad buuxiseen usoo qaata booqashada Xarunta Daryeelka Caafimaadka Carruurta ee BVC.
Waxaan ka wada hadli doonnaa jawaabihiinna iyo sidoo kale wixii aan si wadajir ah u aragno inta lagu gudo jiro booqashada.

Somaliska